



UJEEDO: HESHIIS KU SAABSAN KALA GADASHO DHUL BANAAN "LEHNA SHARCI MUNICIPALLE AH"

Maanta oo ay taariikhdu tahay **14/11/2022**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiiska ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha dhabarka Danbe ee Hotel Waheyn ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iyyimid ayagoo heshiis ah, Mudanayaasha hoos ku Xusan:-

ISKA IIBIYE:- Cumar Ibraahim Cali Axmed, Hooyo: Madiino Cali Xasan, Somali ah, Ku Dhashay: Jalalaqsi, Sanadkii: 1954, Degan Muqdisho, Sita: National ID, Lr. 25407018214216	IIBSADE:- Cumar Muxyadiin Cali Maxamuud, Hooyo: Muno Cadaan Maxamuud, Somali ah, Ku Dhashay: Muqdishu, Sanadkii: 1972, Degan Muqdisho
TILMAAMAHA DHULKA LA KALA IIBSANAAYO Dhul Banaan oo Ku yaal: Muqdisho , Degmada: (Hodan) , Goofka Reer Xuseen Fiidoow, Cabirka: (20X30)-M , Looto No: 443-445-F8 , W.M.L: (11149/2017) , Tr. 06/11/2017, Kana Soo Baxay Nootaayo Muqdisho, Uuna Saxiixay Dr. Maxamuud Xaaji Jumcaale(Biil)	SOOHDINTA DHULKA Bari: Jid , Koonfur: Dhul dad, Galbeed: Dhul dad, Waqooyi: Jid QIIMAHA DHULKA: USD \$10,000 (Toban Kun oo Doolarka Mareykanka ah).

B- Aniga oo ah **CUMAR IBRAAHIM CALI AXMED**, Waxaan qoraalkaan ku cadaynayaa aniga oo maskax ahaan iyo Jir ahaanba ka fiyoow in aan ka gaday kuna wareejiyey **CUMAR MUXYADIIN CALI MAXAMUUD** Dhulkayga banaan oo tilmaamihisu sare ku xusan yahay, Waxaan kale oo aan Cadaynayaa in dhulkaan uu ka madax banaan yahay rahan, xuquuq ama sheegasho cid kale, iyo wax kasta oo horjoogsan kara heshiiskan, Sidaas daraadeed Wixii Ceebaal ah, ee Ka Yimaada Dhulkaan Sida Danguud, Dukuminti Ka Horeeyey dukumintigaan, dukuminti been abuur ah, ama Duris Sharci iyo Wixii La Mid ah aniga ayaa Mas'uul Ka ah, Waxaan Kale oo Cadeynayaa in aan Qaatay Dhamaan Lacagta Sare Ku Xusan.

T- Aniga oo ah **CUMAR MUXYADIIN CALI MAXAMUUD** Ahna Iibsadaha dhulkaan, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan ka Gudoomay Iska iibiyaha Milkiyada Dhulkaan Kuna qancay heshiiskan.

J- Anaga oo Kala ah C/kariin Axmed Aw Xasan & C/llaahi Maxamed Jayte (Simbo) Waxaan Cadaynaynaa in aan Markhaatiyaal iyo Goob Joogba Ka nahay Beecaan.

X- ASALKII HORE: Ibraahin Xasan Xuseen RL:- 109011, Tr. 03/03/2014, Sabarlog No: 107/11/2014, Tr. 04/03/2014, Kana Soo Wada Baxeen D/Hoose ee Muqdisho Cabirka (40X30)-M Looto No 442 Ilaaa 445-F8.

SAXIIXA ISKA IIBIYAHA DHULKA

CUMAR IBRAAHIM CALI AXMED

1- C/KARIIN AXMED AW XASAN

SAXIIXA IIBSADAHA DHULKA

CUMAR MUXYADIIN CALI MAXAMUUD

2- C/LAAHI MAXAMED JAYTE (SIMBO)

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

REP. 427/T.P.N/22, Tr. 14/11/2022, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee 1- **Cumar Ibraahim Cali Axmed** Ahna (Iska iibiye), 2- **Cumar Muxyadiin Cali Maxamuud** Ahna (Iibsade) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Beecaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

NOOTAAYAHA

By: Mascuud

Dr. Maxamed C/llaahi Maxamed "Max'ed Notaayo"


MASAWIRKA ISKA IIBIYAHA

CUMAR IBRAAHIM CALI AXMED



MASAWIRKA IIBSADAHA

CUMAR MUXYADIIN CALI MAXAMUUD




MARKHAATIYAASHA

C/KARIIN AXMED AW XASAN



C/LAAHI MAXAMED JAYTE (SIMBO)



JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

جمهورية الصومال

SOMALI REPUBLIC


WARAQADDA AQOONSIGA

بطاقة الهوية

IDENTITY CARD



L. Qaranka/ رقم الهوية / National ID
25407018214216



Magaca/ الاسم / Name

OMAR

IBRAHIM ALI

Taariikhda dhalashada/ الميلاد / Birth
01 Jul 1954 JALALAQSI

Taariikhda la bixiyay/ الاصدار / Issue
17 May 2016 MOGADISHU

Taariikhda uu dhacayo/ الانتهاء / Expiry
16 May 2021

Lab/ Dheddig/ الجنس / Gender
MALE



Computer ID

0073881



566557

LAMBAR BOONADA 001-0000097398

LACAGTA: 25.00



**DOWLADDA HOOSE EE MUQDISHO
MUNICIPALITY OF MOGADISHU**

WARQADDA DIIWAAN GELINTA KALA WAREEJINTA DHULKA

Date Issued 15-Nov-2022

Dowladda Hoose ee Muqdisho waxey diiwaangalinasay Becca lambarkiisu yahay

REF-NO. 427/T.P.N

Taariikh

15-Nov-2022

Booska lotto no

443-445.F8

Cabirkisuna yahay

20 x 30-M

Kuna yaala

Degmada/Deegaanka

Hodan

Kana soo baxay nootayada

Maxamed Cabdullaahi Maxamed siyaad

Kuna wareegay

CUMAR MUXYADIIN CALI MAXAMUUD

Kana wareegay

CUMAR IBRAAHIM CALI AXMED

Asalka: magaca loo cabiray:

IBRAAHIM XASAN XUSEEN RL:-109011 TR:-3/3/2014 SABARLOG-NO
B.107/B.11/2014 TR:-4/3/2014 D/H/X CABIRKA-40 X 30-M LOTTO-NO 442-
445.F8



Duqa Magaalada ee Muqdisho

Mayor of Mogadishu

Yuusuf Xuseen Jimcaale





JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMALIYA
Wasaaradda Maaliyadda
Waaxda Canshuuraha Barriga
WARQADDA RUQSADA GADIDDA HANTIDA

TIRSI# : 2022 - TRS-154415



Waaxda Canshuuraha Barriga ee Wasaaradda Maaliyadda Waxey Ruqseysay Wareejinta Hantida ay faahfaahinteedu hoos ku xusan tahay:

NOOCA HANTIDA MA GUURTADA AH:

DHUL BANAAN

LOT NUMBER

443- 445-F8

TITLE DEED NO

W.M.L(11149/2017) TR 06/11/2017

DEGMADA

Hodan

CABIRKA

20X30-M

CIDDA WAREEJINEYSA

CUMAR IBRAAHIM CALI AXMED

CIDDA LAGU WAREEJINAYO

CUMAR MUXYADIIN CALI MAXAMUUD

NOTARY

NOOTAAYO TAYO

NOTARY REF

427/T.P.N/22

QIIMAHA LAGU KALA GATAY

\$10,000.00

Taariikda la bixiyey:

14/11/2022 00:00:00



TRS-
154415

Waaxda Canshuuraha Barriga





JAMHUURIYADDA FEDERAALIGA SOOMAALIYA

XAFIISKA NOOTAAYAHA MUQDISHO

Rep.n 11149/2017

UJEEDDO: CADDAYN KU SAABSAN KALA GADASHO DHUL BANNAAN OO MUNIJIBAALE AH

Muqdisho, maanta oo taariikhdu tahay **06/11/2017**, anigoo ah Nootaayo Dr. Maxamuud Xaaji Jumcaale (Biil), ahna Nootaayo Muqdisho, waxaa ii yimid iyagoo heshiis ah, xiskooduna taam yahay, cidina aysan qasbin dadka magacyadoodu hoos ku qoran yihiin, kuwaasoo iga codsaday inaan u kala qoro heshiiskoodaan ku saabsan kala gadasho dhul bannaan oo munijibaale ah, dadkaasina waxay kala yihiin:=====

- 1) Mudane **Abuukar Cabdullaahi Cumar**, ahna 25 sano jir, hooyadiisna la yiraahdo Faadumo Maxamed Xasan, ahna Soomaali, kuna dhashay Muqdisho, masawirkiisuna warqaddaan ku dheggan yahay, ahna laga iibsadaha dhulka, kaasoo dammiinu aqoonsina uu ka yahay Mudane **Cabdullaahi Maxamed Jeyte**, lehna warqadda aqoonsiga ee lambarkeedu yahay **000152374**;==
- 2) Mudane **Cumar Ibraahim Cali**, ahna 63 sano jir, hooyadiisna la yiraahdo Madiino Cali Xasan, ahna Soomaali, kuna dhashay Degmada Jalalaqsi, ahna iibsadaha dhulka.=====

Dadkaas dhulka kala iibsaday anigoo Nootaayo ahi markaan dhegeystay iyaga iyo markhaatiyaasha la socda, waxaan go'aansaday inaan u kala qoro heshiiskoodaan ku saabsan kala gadashada dhul bannaan oo munijibaale ah. Mudane Abuukar Cabdullaahi Cumar wuxuu Mudane Cumar Ibraahim Cali ka iibiyey dhulkiisa ah **20x30**, lana mid ah **600MQ**, kuna qoran lotto lambar: **443** iyo **445-F8**, kuna yaalla Degmada Hodan, wuxuuna kaga iibiyey dhulkaas lacag dhan **USD 5,500** (Shan kun iyo shan boqolo doollar) oo israac ah, lacagtaasoo la wada bixiyey, gacantana laga wada saaray laga iibsadaha dhulka, iyadoo aysan waxba ka maqnayn. Dhulkaasi waxuu ka mid yahay dhulka Mudane Abuukar Cabdullaahi Cumar uu ku yeeshay qoraalka lambarkiisu yahay **7859/2017**, taariikhdiisuna tahay **12/03/2017** ee uu qoray Nootaayo Dr. Maxamuud Xaaji Jumcaale (Biil). Dhulkaas waxay sohdimihiisu yihiin sidatan: **Waqooyi** iyo **Bari** waxaa ka xiga jidad, dhinacyada kalena waxaa ka xiga dhulal dadeed, iibsaduhuna wuxuu caddaynayaa inuu soo arkay dhulkaas, fiiro gaar ahna u soo yeeshay, inuu la wareegana uu diyaar u yahay. Sidaas daraaddeed, wuxuu laga iibsadaha dhulku qoraalkaan ku caddaynayaa inuu masuul ka noqon doono wixii ceebaal ah ama durid sharci ah ee ka yimaada dhulkaas milkiyaddiisa, heshiiskana sidaas ayaa lagu dhammeeyey. Markaas kaddib anigoo Nootaayo ahi waxaan qoray warqaddaan, una akhriyey labada dhinac ee dhulka kala iibsaday iyo markhaatiyaasha la socda, inta ku qoran oo dhan ayeyna isku raaceen, islana oggolaadeen, kaddibna halkaan hoose ayey wada saxiixeen. =====

SAXIIXA LABADA DHINAC

1) Mudane Abuukar Cabdullaahi Cumar

(libiye) _____

2) " Cumar Ibraahim Cali

(libsade) _____

SAXIIXA DAMMIINU AQOONSIGA

1) Mudane Cabdullaahi Maxamed Jeyte

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

1) Mudane Maxamed Jimcaale Axmed

2) " Jaamac Cali Xalane

SAXIIXYO LA SUGAY

Anigoo ah Nootaayo Dr. Maxamuud Xaaji Jumcaale (Biil), ahna Nootaayo Muqdisho, waxaan qoraalkaan ku caddaynayaa in 5ta qof ee kor ku qoran ay saxiixyada ku hor qorani yihiin kuwoodii runta ahaa, dadkaasoo kala deggan Muqdisho iyo Afgooye, ahna Soomaali, kuwaasoo qoraalkaan wadajir hortayda ugu saxiixay kaddib markaan u akhriyey, kuna qanceen.=====

NOOTAAYO

Dr. Maxamuud Xaaji Jumcaale (Biil)



Masawirka laga iibsadaha dhulka



Masawirka iibsadaha dhulka



Beec

P-427/Top.N/22

T-14/1/22

20X30

L-443-

445-f8

Masawirka dammiinu aqoonsiga



Masawirka markhaatiga 1aad



Masawirka markhaatiga 2aad




JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال
SOMALI REPUBLIC



WARQADDA AQOONSIGA
البطاقة الشخصية

000152374



IDENTITY CARD

Magaca / الاسم / Name

**ABDULLAHI
MOHAMED JEYTE**

Taariikhda dhalashada / التاريخ / Date of Birth

07 FEB 1972

Meesha dhalashada / المكان / Place of Birth

EL-DER

Taariikhda la bixiyay / التاريخ / Date of Issue

27 OCT 2013



Lab/Dheddig / الجنس / Gender

MALE



**GUURİYADDA FEDERAALIGA SOOMAALIYA
XAFIISKA NOOTAAYAHA MUQDISHO**

Rep.n 7859/2017

UJEEDDO: CADDAYN KU SAABSAN KALA GADASHO DHUL BANNAAN OO MUNIJIBAALAH

Muqdisho, maanta oo taariikhdu tahay **12/03/2017**, anigoo ah Nootaayo Dr. Maxamuud Xaaji Jumcaale (Biil), ahna Nootaayo Muqdisho, waxaa ii yimid iyagoo heshiis ah, xiskooduna taam yahay, cidina aysan qashin dadka magacyadoodu hoos ku qoran yihiin, kuwaasoo iga codsaday inaan u kala qoro heshiiskoodaan ku saabsan kala gadasho dhul bannaan oo munijibaale ah, dadkaasina waxay kala yihiin:=====

- 1) Mudane Ibraahim Xasan Xuseen, ahna 44 sano jir, hooyadiisna la yiraahdo Xaliimo Maxamed Ibraahim, ahna Soomaali, kuna dhashay Muqdisho, masawirkiisuna warqaddaan ku dheggaan yahay, ahna laga iibsadaha dhulka, kaasoo dammiinu aqoonsi uu ka yahay Mudane **Maxamed Xasan Xuseen**, lehna warqadda aqoonsiga ee lambarkeedu yahay **26601012640929**;=====
- 2) Mudane Abuukar Cabdullaahi Cumar, ahna 25 sano jir, hooyadiisna la yiraahdo Faadumo Maxamed Xasan, ahna Soomaali, kuna dhashay Muqdisho, ahna iibsadaha dhulka, kaasoo beeca dhulka uu uga wakiil yahay Aabbihiis **Cabdullaahi Cumar Cali**.=====

Wakiilka iibsadaha dhulka iyo laga iibsadaha dhulka, anigoo Nootaayo ahi markaan dhegeystay iyaga iyo markhaatiyaasha la socda, waxaan go'aansaday inaan u kala qoro heshiiskoodaan ku saabsan kala gadashada dhul bannaan oo munijibaale ah. Mudane Ibraahim Xasan Xuseen wuxuu Mudane Abuukar Cabdullaahi Cumar ka iibiyey dhulkiisa ah **40x30**, lana mid ah **1,200MQ**, kuna qoran lotto lambar: **442, 443, 444** iyo **445-F8**, kuna yaalla Degmada Hodan, wuxuuna kaga iibiyey dhulkaas lacag dhan **USD 6,000** (Lix kun oo doollar) oo bannaan, lacagtaasoo la wada bixiyey, gacantana laga wada saaray laga iibsadaha dhulka, iyadoo aysan waxba ka maqnayn. Dhulkaas wuxuu Mudane Ibraahim Xasan Xuseen uu ku yeeshay xaashida lacag qabashada ee lambarkeedu yahay **109011**, taariikhdeeduna tahay **03/03/2014** iyo warqadda lahaanshaha dhulka (Sopralluogo) ee lambarkeedu yahay **109011**, taariikhdeeduna tahay **04/03/2014**, **Bollettario No. 107**, **Bolletta No. 11** ee Dowladda Hoose Muqdisho. Dhulkaas waxay sohdimihiisu yihiin sidatan: **Waqooyi, Bari** iyo **Koonfur** waxaa ka xiga jidad, **Galbeedna** waxaa ka xiga dhul dad, wakiilka iibsaduhuna wuxuu caddaynayaa inuu soo arkay dhulkaas, fiiro gaar ahna u soo yeeshay, inuu Wiilkiisa Abuukar Cabdullaahi Cumar u iibiyana uu diyaar u yahay. Sidaas daraaddeed, wuxuu laga iibsadaha dhulku qoraalkaan ku caddaynayaa inuu masuul ka noqon doono wixii ceebaal ah ama durid sharci ah ee ka yimaada dhulkaas milkiyaddiisa, heshiiskana sidaas ayaa lagu dhammeeyey, markaas kaddib anigoo Nootaayo ahi waxaan qoray warqaddaan, una akhriyey labada dhinac ee dhulka kala iibsaday iyo markhaatiyaasha la socda, inta ku qoran oo dhan ayeyna isku raaceen, islana oggolaadeen, kaddibna halkaan hoose ayey wada saxiixeen. Qoraalkaan waxaa iibsadaha dhulka u qaaday, una saxiixay Aabbihiis **Cabdullaahi Cumar Cali**.=====

- 1) Mudane Ibraahim Xasan Xuseen
- 1) Mudane Cabdullaahi Cumar Cali
- 1) Mudane Maxamed Xasan Xuseen
- 1) Mudane Mukhtar Axmed Maxamuud
- 2) " Axmed Maxamuud Maxamed

SAXIIXA LAGA IIBSADAH DHULKA

SAXIIX WAKILKA BEECA DHULKA

SAXIIX DAWLADHAY

SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

SAXIIXYO LA SUGAY

Anigoo ah Nootaayo Dr. Maxamuud Xaaji Jumcaale (Biil), Nootaayo Muqdisho, waxaan qoraalkaan ku caddaynayaa in 5ta qof ee kor ku qoran ay saxiixyada ku hor qorani yihiin kuwoodii runta ahaa, dadkaasoo kala deggan Muqdisho iyo Afgooye, ahna Soomaali, kuwaasoo qoraalkaan wadajir hortayda ugu saxiixay kaddib markaan u akhriyey, kuna qanceen.=====



NOOTAAYO
Dr. Maxamuud Xaaji Jumcaale (Biil)

Masawirka laga iibsadaha dhulka




Masawirka wakiilka beeca dhulka



Waxaa la iibsaday
20x30 L.n 443 190 445-F
Rep.n 17749/2017
15.06/11/2017

Masawirka dammiinta aqoonsiga



Masawirka markhaatiga 1aad



Masawirka markhaatiga 2aad



JAMHUURIYADDA SOOMALIYA

جمهورية الصومال

SOMALI REPUBLIC


WARAQAADDA AQOONSIGA

بطاقة الهوية

IDENTITY CARD

L. Qaranka/الهوية رقم/National ID

26601012640929



Magaca/الاسم/Name

MOHAMED

HASSAN HUSSEIN

Taariikhda dhalashada/الميلاد/ Birth

01 Jan 1966

MOGADISHU

Taariikhda la bixiyay/الاصدار/ Issue

08 Dec 2014

MOGADISHU

Taariikhda uu dhacayo/الانتهاء/ Expiry

07 Dec 2019

Lah/Dheddig/الجنس/ Gender

MALE





598/017 Heeban
DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO

4/02.30 WAAXDA DHULKA 4/42 44575

Xaashida lacag Qabashada No.: 109011

Mud / Mar. Ibraahim Xasan Xaas

Waxaan ka qabtay Sh. So. 1800000 (1.8 milyan)
Sh. So. (1800000)

oo ah uu Baah

Muqdisho 03/03/14

B-Qofka Lacagta Bixiyay
T-Maamulka Lacagta
J-Nuqul ku haraya Boloogga

Saxiixa Lacag qabta

Waxaa laibsaday
40X30 IN 442
443 444 → 445-F8
Rfm 7859/2017
Tr 12/03/2017



**DAWLADDA HOOSE EE MUQDISHO
WAAXDA DHULKA**

No.: 109011

Soo Gelidda Warqadda

Tirsi

Taariikh

109011
4-3-2014



Bollettario No.:

Bolletta No.:

Sannadka

107
11
2014

WARQADDA LAHAANSHAHA DHULKA

Mud / Mar.:

Ibrahim Hassan Hassan

Og.: Tal. Ciidaanka Boliska Dawladda Hoose Muqdisho

- Xamar.

Mudanaha / Marwada kor ku qoran waxaa loo oggolaady inuu / iney dhisto Cariish, Baraako ama

Guri Dhagax ah

40 X 30

oo uu ka dhiso cad dhul ah oo

le'eg

Deftuur

kuna yaal Xaafadda

Hodon

Soohdintiisuna tahay

412

X. Woqooyi

X. Galbeed

X. Bari

415-F8

iyo Koofur

Warqaddaan xaq waxaad ugu leedahay muddo laba iyo toban (12) bilood ah oo maanta

Ka billaabmanta, fasax la'aan inaad dhulka dhistid.

Warqadda lacag qaabashada No.

109011

ee

3-3-2014

Muqdisho, Taariikh

4-3-2014

Agaasimaha Waaxda Dhulka

Duqa Magaalada

[Signature]


[Signature]

Waxaa Leibsaday
40X30 IN 442

443 - 444 iy 445 - F8

Rqo 7859/2017

Tr 12/03/2017



For More Info Please




FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 19/11/2022

Aniga oo ah **Sayid-Cali C/llaahi Maxamed** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **Cumar Muxyadiin Cali Maxamuud** Dukumiintiga **Original** Beeca Dhulka ee **Rep No. 427/W.P.N/22, Tr. 14/11/2022**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca Iibsadaha	Cumar Muxyadiin Cali Maxamuud
Cabirka	20X30
Ku Yaallo	Muqdisho, Degmada Hodan
Lotto Lambar	443-445-F8
W.M.L	11149/2017, Tr. 06/11/2017 Ka soo baxday Nootaayo Muqdisho
Taariikhda Beeca	14/11/2022
La Socoto	<input checked="" type="checkbox"/> Wasaarada Maaliyadda <input checked="" type="checkbox"/> Dowladda Hoose

Iibsade: Aniga oo ah **Cumar Muxyadiin Cali Maxamuud**, Leh Tel No. **0617342701**, Degan **Muqdisho** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Waddani** Dukumiintiga Dhulka faah faahintiisu Sare ku cadahay.



SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Sayid-Cali C/llaahi Maxamed

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

Cumar Muxyadiin Cali Maxamuud